

BILAABIDDA BARBAARINTA HORE

Varhaiskasvatuksen aloittaminen (somalí)




La qabsiga xannaanada

U gudbidda daryeelka guriga laga joogo oo loo gudbayo xannaanada waa isbeddel weyn oo ku yimaadda ilmaha iyo qoyska oo dhan. Waa muhiim in si wanaagsan loogu diyaar garoobo. Qaabka deggan ee waalidku uga falceliyo bilaabidda xannaanada wuxuu xoojiyaa dareenka amniga ee ilmaha.

La heshii muddada is-barashada shaqaalaha xannaanada. Inta lagu jiro waxaad ilmahaaga kula joogi kartaa xannaanada. U sheeg shaqaalaha rabitaannadiinna iyo baahiyaha ilmahaaga.



Sawirrada: : Unsplash / Sandra Seitamaa



Sawirrada: : Unsplash / Getty Images

Marka ilmuhu markii ugu horreysay kaligiis ugu haro xannaanada, tagidda waalidka ayaa adkaan kara. Ka fikir hab cad oo gaaban aad ilmaha ugu macsalaamayso. Marka waalidku baxo ka dib, ilmuhu badanaa si dhakhso ah ayuu u degaa.

Haddii ay suurtagal tahay, ku bilaaba maalmo gaagaaban. Waxaa habboon in laga fogaado isbeddello kale oo waaweyn oo ku yimaadda nolol-maalmeedka ilmaha. Waxyaabaha isku midka ah ee soo noqnoqda waxay ka caawiyaan ilmaha xaaladda cusub.

Maxaa lala aadayaa xannaanada?



Ilmaha u geli xannaanada dhar ay ku fududahay inuu ku ciyaaro oo ku dhaqaaqo isla markaana ay fududahay in la gashto. Ku qor magaca dharka ilmaha iyo agabka kale. Waxyaabaha la yaqaan waxay keenaan ammaan deegaan cusub.

Ku rid boorsada ilmaha:

- Kabaha gudaha, dhar beddel ah iyo boombale hurdo
- Xafaayado iyo mujuruc, haddii ilmahaagu u baahan yahay
- Dhar jimicsi (tusaale ahaan surwaal gaaban iyo funaanad gacmo-gaab ah)
- Dhar bannaanka lagu xirto oo ku habboon cimilada
 - o Maalinta roob da'ayo: dharka roobka iyo kabaha roobka
 - o Maalinta qabow badan tahay: dhar suuf leh iyo laba gacmo oo barafka ah
 - o Maalinta kulayl badan tahay: koofiyad, kareemka qorraxda iyo dhalo biyo ah
- Agab kale oo xannaanadu kaa codsato inaad keento



Sawirrada: : Unsplash / de jong



**Euroopan unionin
osarahoittama**

Mashruuca Niitty 2 2023–2026

*Wadajir loogu shaqaynayo nolol-maalin leh oo
wanaagsan ee qoysaska soo galootiga ah.*

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca:
projects.tuni.fi/niitty2

Albaabka macluumaadka qoysaska: tuni.fi/perheinfo

Samaynta warqaddan waxaa laga faa'iidaystay agabka Opetushallitus
(www.oph.fi).

Sawirrada: Unsplash (la soo dejiyay 2.2.2026)



**Pirkanmaan
hyvinvointialue**



TAMPERE